

Somali

Xulashashada Agabka Tacliinta Suugaanta Af-Englishka

Qoysaska SPS ee Qaayaha leh,

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay dooran doonaan agab cusub oo akhris iyo qoraal dhijitaal ah oo loogu talagalay ardayda ku jirta fasallada barbaarinta ilaa fasalka 5aad. Agabka waxa ku jira buugaagta sheeka baraleyda iyo kuwa dhabta ku salysan, xaashiya shaqada, iyo agab online ah ee ardayda iyo shaqaalaha.

Shaqqadani waa lama horaan sababtoo ah shatiga barnaamijka akhriska ee hadda wuu dhamaanayaa, agabyada aan hadda haatan adeegsanona dib looma soo saari doono. Tani waxay sidoo kale na siinaysaa fursad aan ku adeegsano cilmi-baaristii ugu dambeysay ee sida carruurtu u bartaan wax-akhriska.

Nidaamku wuxuu bilaabmi doonaa dhammaadka bisha Maayo iyadoo go'aanka kama dambaysta ah la horgeynayo guddiga dugsiga Maarsa 2026.

Waxaanu Jecelnahay Inaanu Maqalo Jawaab Celintaada

Waxaan abuureynaa koox ka caawisa doorashada alaabtan cusub. Waxaan rabnaa guddi ka kooban macalimiin, hoggaamiyeasha dugsiga, qoysaska, iyo xubnaha bulshada oo mataala baahiyaha kala duwan ee degmadeena. Guddigu waxa ay ka wada shaqayn doonaan sidii ay u soo qaadan lahaayeen agab wax-akhris oo tayo sare leh, iyaga oo ka caawinaya in agabku si fiican ugu shaqeeyo dhammaan ardayda.

Ku biir guddiga xulashada

Waxaan ku dhiirigelinaynaa qof kasta oo danaynaya inuu codsado. Codsiyada waa in la soo gudbiyaa May 2. **Fadlan ogow: Waa in aad ka soo qaybgeli kartaa dhammaan shirarka (ilaa 12 maalmood oo kulan ah).**

Waad ku mahadsan tahay wadaagida fikradahaaga ku saabsan waxa sida ugu wanaagsan u dabooli doona baahida ardaydeena. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir Kathleen Vasquez, Maamulaha Barnaamijka ELA - Iskuduuhaha Korsashada, kavasquez@seattleschools.org.

Isku-duwayaasha Xulashada ELA ee K-5

Daacadnimo

Kathleen Vasquez

Maareeyaha Barnaamijka ELA

Dugsiyada Dadweynaha Seattle